

3 Sababood oo Muhiim ah Ee Loogu Talagalay Dadka Waaweyn Si Ay Tallaalka uu Qaatan

Waxaa laga yaabaa inaad ogayn inaad u baahan tahay tallaalo nololaha oo dhan. Tallaaladu waxay muhiim u yihiin caafimaadkaaga waa tan saddex sababood oo ay taasi muhiim uu tahay.



1. Waxaa laga yaabaa inaad halis ugu jirto cudurro halis ah oo weli ku badan U.S.

Sannad kasta kumannaan qof oo dad waaweyn ah oo ku nool Mareykanka ayaa la bukoodaa cudurro laga yaabo in looga hortagi lahaa tallaalada - dadka qaarkood ayaa isbitaal la dhigaa, halka qaarna ay uu dhintaan.

Xataa haddii aad dhammaan tallaallada qaadatay adigoo ilma ah, awoodda ay tallaallada qaarkood uu leeyihiin ka-hortagga cudurrada meesha ayay ka bixi kartaa muddo kadib. Waxa kale oo laga yaabaa inaad halis ugu jirto cudurro kale sababo la xiriira da'daada, shaqadaada, qaab nololeedkaaga, safarkaaga, ama xaaladahaaga caafimaad.

2. Ma awoodid inaad halis u gasho inaad xanuunsato.

Xitaa dadka caafimaadka qaba way bukoon karaan iyadoo taasi ay ka dhigi karto iney seegan shaqadooda ama ay aadan dugsi. Haddii aad xanuunsan tahay, waxaa laga yaabaa inaad awoodin inaad daryeesho qoyskaaga ama aad gudato mas'uuliyadaha kale.

3. Waxaad ilaalin kartaa caafimaadkaaga iyo caafimaadka kuwa jooga agagaarka markaad qaadato tallaalada lagula taliyey.

Tallaaladu waxay yareeyaan fursadda aad ku xanuunsan karto. Tallaaladu waxay la shaqeeyaan difaaca dabiiciga ah ee jirkaaga si ay u yareeyaan fursadaha ah iney kugu dhacan cudurrada qaarkood iyo sidoo kale dhibaatooyin ka yimaada cudurradan.

Tallaaladu waxay yareeyaan fursadda aad ku faafin karto cudurrada qaarkood. Waxaa jira waxyaabo badan oo aad rabto inaad u gudbiso kuwa aad jeceshahay; cudur lagaga hortagi karo tallaalka kamid maaha kuwaasi. Dhallaanka, dadka waaweyn, iyo dadka habdhiska difaaca jirkoodu daciif yahay (sida kuwa laga daweynayo kansarka) ayaa si gaar ah ugu nugul cudurrada lagaga hortagi karo tallaalka.

Tallaaladu waa mid ka mid ah siyaabaha ugu badbaadsan ee lagu ilaaliyo caafimaadkaaga. Waxyeellada tallaalku inta badan waa kuwo fudud oo iskood u baxa. Waxyeellooyinka daran aad bay dhif u yihiin.

Waa maxay tallaalada aad u baahan tahay?

Dhammaan dadka waaweyn waa inay helaan:

- Tallaalka hargabka sannad kasta si looga ilaaliyo hargabka mar mar uun dilaaca
- Td/Tdap si looga ilaaliyo teetanada, gawracatada, iyo xiiq-dheerta (qufac daran)

Iyadoo ay ku saleysan tahay da'daada, xaaladahaaga caafimaad, tallaalada aad qaadatay marka aad ilmo ahayd, iyo arrimo kale, waxaa laga yaabaa inaad u baahato tallaalo dheeraad ah sida:

- Busbuska
- Cagaarshowga A
- Cagaarshowga B
- Cabuqa Galmada lagu kala Qaado (HPV)
- MMR (Jadeecada)
- Meningococcal (Qoorgooyaha uu keeno bakteeriyaha maskaxda galo)
- Pneumococcal Cudurka Neefmareenka ku dhaca
- Shingles (Finan ka soo baxa qayb kamid ah wejiga ama jirka)

Qaadashada

Dadka waaweyni waxay tallaalada ka qaadan karaan xafiisyada dhakhaatiirta, farmashiyeyaasha, goobaha shaqada, xarumaha caafimaadka bulshada, waaxaha caafimaadka, iyo meelo kale. Si aad u hesho bixiyaha tallaalka ee kugu dhow, booqo <http://vaccine.healthmap.org>.


Inta badan qorshayaasha caymiska caafimaadku waxay daboolaan kharashka tallaallada lagula taliyey. Ka hubi bixiyahaaga caymiskaaga faahfaahinta iyo liiska bixiyeyaasha tallaalka. Haddii aadan lahayn caymiska caafimaad, booqo www.healthcare.gov si aad wax badan uga ogaato fursadaha caymiska caafimaadka.



HA SUGIN. TALLAAL!

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo
www.cdc.gov/vaccines/adults

3 Sababood oo Muhiim ah Ee Loogu Talagalay Dadka Waaweyn Si Ay Tallaalka uu Qaatan



Cudurada iyo tallaalka ka caawiya ka hortaggooda	Sida cudurku kuu saameyn karo
Hargabka ku dhaca Sambabada Tallaalka hargabka mar mar uun dilaaca	Qandho ama dareemo werwer ah/cabsi, qufac, madax xanuun, diif ama sanko oo ku xirma, cune xanuun, murqo ama jir xanuun, iyo daal (aad u daalan), dadka qaarna waxaa laga yaabaa inay matagan iyo shuban, inkastoo tani ay aad ugu badan tahay carruurta marka loo eego dadka waaweyn. Dhibaatooyinka Cudurka: Oof-wareen (cabuq ku dhaca sambabada), xaaladaha caafimaad ee daba dheeraada oo ka sii dara, in isbitaal lagu dhiggo, taasi oo suurtoagal ah in ay keento naafonimo, ama xataa dhimasho
Cagaarshowga A Tallaalka Cagaarshowga A	Qandho, daal, calool xanuun, cunto xumo, matag, cagaarshow (maqaarka iyo indhaha oo huruud ku noqda), iyo kaadida oo madow ku noqota; si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in aaddan isku arag calaamado. Dhibaatooyinka Cudurka: Beerka oo shaqadiisa gaba; kalagoysyada (xanuunka kalagoysyada jirka); iyo xanuunada kelyaha, xameetida iyo dhiiga
Cagaarshowga B Tallaalka Cagaarshowga B	Xanuun u eg hargab oo cuntada ku nacsiinaayo, qandho, daal, daciifnimo, lallabbo, matag, cagaarshow, iyo xanuunka kalagoysyada jirka; si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in aaddan isku arkin wax calaamado ah. Dhibaatooyinka Cudurka: Cabuqa beerka ee raaga, beerka oo shaqadiisa gaba, iyo kansarka beerka
Cabuqa Galmada lagu kala Qaado (HPV) Tallaalka HPV	Inta badan, ma jiraan wax calaamado ah sanado ilaa uu kansarku soo baxo. Dhibaatooyinka Cudurka: Kansarka ilmo-galeenka, siilka, iyo furuuraha siilka ee haweenka; kansarka guska ee ragga; iyo buurooyinka xubinta taranka iyo kansarka futada iyo kansarka cunaha galo ee haweenka iyo ragga labadaba.
Jadeecada Tallaalka MMR	Qandho, diif, qufac iyo finan jirka oo dhan ka soo baxa. Dhibaatooyinka Cudurka: Cabuqa dhegta, oof-wareen, bararka maskaxda ee uu sababo cabuqa, ama xitaa dhimasho
Qoorgooyaha uu keeno bakteeriyaha maskaxda galo Tallaalka Qoorgooyaha	Lalabbo, matag, qoorta oo ku xanuunto, qandho, madax xanuun, inaad xasaasiyada iftiinka aad ku qabto ay kororto, jahawareer, daal, iyo finan. Dhibaatooyinka Cudurka: Dhaawac dhanka maskaxda ah, in gacmaha ama lugaha laga jaro, inaad dhagool noqoto, qalal, faalig, ama xataa dhimasho
Cudurka Neefmareenka ku dhaca Tallaalka Cudurka Neefmareenka	Qandho, cabsi, neefsashada oo kugu adkaata, laab xanuun, qoorta oo ku xanuunto, dhego xanuun, inaad xasaasiyada iftiinka aad ku qabto ay kororto, iyo qufac. Dhibaatooyinka Cudurka: Cabuqyada sambabada, dhegta dhexe, ama daldaloolada lafaha wejiga ama madaxa, dhibaatooyinka wadnaha, dhaawaca maskaxda, inaad dhagool noqoto, in gacmaha ama lugaha laga jaro, ama xitaa dhimasho
Finan ka soo baxa qayb kamid ah wejiga ama jirka Tallaalka finan ka soo baxa qayb kamid ah wejiga ama jirka	Finanka xanuunka badan oo ka soo baxa qayb kamid ah wejiga ama jirka, kuwaas oo barara ka dibna caadi ahaan qolof noqda, madax xanuun, qandho, cabsi, iyo calool xanuun. Dhibaatooyinka Cudurka: Xanuun daran oo socon kara bilo ama sanado ka dib marka finanku baxo, oof-wareen, indho beelid iyo dhagoolnimo, ama xataa dhimasho
Teetanada Tallaalka Td/Tdap	Xanuun aad uu daran iyo xanuun murqaha oo dhan ah, daanka oo ku xanuuno (oo ay kugu adkaato in aad afka kala furto), wax liqidda ama neefsashada oo ku adkaata, murqaha oo ku xanuuno, iyo qandho. Dhibaatooyinka Cudurka: Lafa jaban, neefsashada oo kugu adkaata, ama xitaa dhimasho
Qufac daran (Xiiq-dheerta) Tallaalka Tdap	Calaamadaha hargabka oo daba dheeraada (qufac iyo diif) taasoo keenta qufac xoog leh ama sidii adiga oo marganeyso taasoo kugu adkeyneysa in aad neefsato, wax aad cabto, ama aad cunto. Dhibaatooyinka Cudurka: Jabka feeraha, oof-wareen, ama xitaa dhimasho

Si aad u hesho liiska buuxa ee dhammaan cudurada lagaga hortagi karo tallaalka, booqo: www.cdc.gov/vaccines/vpd-vac

Ma dibadda ayaad uu Safreysa? Waxaa jiri kara tallaalo dheeraad ah oo aad u baahan tahay. Ka ogow: www.cdc.gov/travel

Kala hadal xirfadlahaaga daryeelka caafimaadka si aad u hubiso inaad la socoto tallaalka lagugula taliyay.

Wixii macluumaad oo dheeraad ah ee ku saabsan tallaalka, booqo www.cdc.gov/vaccines/adults ama isticmaal Qalabka Qiimaynta Tallaalka Dadka Waaweyn ee www2.cdc.gov/nip/adultimmsched/ si aad u ogaato tallaalka aad u baahan karto.



HA SUGIN. TALLAAL!

Wixii macluumaad oo dheeraad ah, booqo www.cdc.gov/vaccines/adults